OREGON DEPARTMENT OF **Human Services**

# Qorshaynta Degganaansho Maskaxeed: Hage Xaaladda Gurmadka oo Shakhsiyeed

## Khayraad ikhtiyaari ah oo ka caawiya shakhsiyaadka iyo qoysaska inay u diyaargaroobaan xaaladaha kediska ah.

### Sababta diyaargarowgu muhiim u yahay

Khayraadka ka socdo Xafiiska Horumarinta Musaafirka iyo Qaxootigu wuxuu ka caawiyaa shakhsiyaadka iyo qoysaska inay u diyaargaroobaan dhacdooyinka kediska ah. Waa agab ikhtiyaari ah oo la waafajin karo baahiyahaaga. Xaaladaha gurmadka xilli kasta waa iman karaan. Qorshe ka yeelashadu waxay ka caawisaa adiga iyo ehelkaagu inaad badbaadaan, ku xirnaataan, oo aad xogogaal noqotaan marka ammuuruhu kedis isku beddelaan.

### Tallaabooyinka muhiimka ah ee ay in la tixgaliyo

1. **Aqoonso Cid lala Xiriiro Xaaladda Gurmadka**
    - Dooro ugu yaraan laba qof ood ku kalsoon tahay–-mid gudaha jooga iyo mid jooga dibadda ku xigta meeshaad joogto–-kaasi oo lala xiriiri karo haddayba dhacdo xaalad gurmad ah.
    - Qor lambarada taleefanooda oo ku hayso boorsadaada, taleefanka, ama meel kale oo badbaado leh.
2. **Ogow Macluumaadka Muhiimka ah**
    - Diiwaangasho macluumaadka daruuriga ah sida daawooyinka, bixiyayaasha caafimaadka, cidda lala xiriiro dugsiga, iyo wixii baahi ku-tiirsane ah.
    - Hubi in qof aad ku kalsoon tahay yaqaano sida loo heli karo macluumaadkan haddii loo baahdo.
3. **Qorshee Baahiyaha Qoyska**

    - Kala hadal xubnaha qoyska ama cidda guriga aad wadaagtaan waxa la samayn karo haddii cidi aysan awoodin inay xiriir samayso isla markiiba.
    - Aqoonso goob kulan oo badbaado leh oo wadaag lambarada cidda lala xiriiro ee muhiimka ah.
4. **Ilaasho Nuqulada Dokumentiyada Muhiimka ah**
    - Ku hayso nuqulada aqoonsiga, caymiska, iyo dokumentiyada sharci meel ammaan ah.
    - Hadday suurtogal tahay, sii nuqul saaxiib aad ku kalsoon tahay ama xubin qoys.
5. **Ogow Khayraadka Deegaankaaga**
    - Baro taleefanada tooska ah, ururada bulshada, ama khayraadka sharciga iyo caafimaadka ee deegaanka ee caawimo aad ka heli karto xilliga dhibtu jirto.

## Ogow khayraadka deegaankaaga

- Equity Corps of Oregon – Adeegup Sharciga Musaafirka oo Bilaash ah
- Oregon for All – Khayraad iyo Agabka Caddaaladda Musaafiriinta
- Barnaamijka Qaxootiga ODHS
- Oregon Law Center and Latino Network – Hagayaasha Ilaali Qoyskaaga (Ingiriisi iyo Isbaanish)

**Dejinta qorshe waa ikhtiyaari waxayna caawin kartaa yaraynta cadaadiska wakhtiyada hubinta la'aanta. Sirtu waa isdiyaarin–-ma aha saadaalinta xaaladaha gurmadka ah.**

---

Dokumentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala xiriira OIRA oira.info@odhsoha.oregon.gov. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay..